



# Xuquuqaha aad ku Leedahay Waalidka iyo Ilaaliyaha

Your Rights with Your Parents and Guardians

## Waa maxay waxa waalidiinta iyo mas'uuliyiintu ay tahay inay sameeyaan?

Minnesota, waa waajib saaran waalidiinta iyo ilaaliyeyaashu in ay daryeelaan carruurtooda ilaa ay ka gaaraan 18. Waalidku waxay kale oo samayn karaan oo fulinna karaan xeerar macquul ah. Waa in aad raacdid xeerarka waalidka ay jideeyaan. Waxaad xaq u leedahay in aad waalidkaa ka filatid in ay sugaan amnigaaga kuna daryeelaan.

## Xeerarka Macquulka ah

Waalidkaagu wuxuu jidayn karaa xeerar ay ka mid yihiin:

- Xilliga aad guriga imaanaysid
- Meelaha aad aadi kartid
- Cidda aad waqti la soo qaadan kartid
- Shaqooyinka aad guriga ka qabanaysid
- In aad shaqayn kartid iyo in kale
- In aad aadi kartid barnaamijyada ka baxsan saacada iskoolka sida cayaaraha iyo naadiyada



## Awooda Macquulka ah

Waalidku waxay adeegsan karaan awood macquul ah si ay u qabtaan ama u saxaan ilmahooda. Haddii waalidkaa ay adeegsadaan awood aan macquul ahayn, ka eeg **sida caawinaad loo helo** bogga soo socda.

## Falalka Sharcidarrada ah

Waa sharcidarro in waalidku:

- Adeegsado ama ku gooddiyo awood aan macquul ahayn ama edbin naxariisdarro ah
- Aysan siinnin ilmaha cunto, dhar, hoy, daryeel caafimaad, ama ilaalinta loo baahan yahay oo ku habboon ilamaha da'dooda
- Si ogaalka ay u oggolaadaan in ilmaha lagu sameeyo waxyeello jirka ama jinsga galmada ah
- Si ula kac ah ay ilmaha u oggolaadaan in uu ku sugnaado meel khatar ah

- Si ogaal ah ay u oggolaadaan in ilmahoodu joogaan meel lagu gado ama lagu hayo daroogo
- Ay oggolaadaan in ilmahoodu ku noolaadaan meel dhibaato leh ama khatar ah
- Ay ilmahooda ka dhaqaaqaan

## Ka Tegidda Guriga

Sida caadiga ah kama guuri kartid guriga haddaysan dhicin in:

- Waalidkaa ay aqbalaan
- Aad gaartay 18
- Aad ku biirtay ciidammada, ama
- Maxkamadi oggolaato



**Haddii waalidkaa ku waxyeelleeyaan ama ku dayacaan, caawinaad doono!**

## Sida loo Helo Caawinaad

Waalidkaa ama ilaaliyahaagu ma ku dayacaan, mase kuu geystaan waxyeello ah jirka, dareenka, ama jinsiga galmada? Ma u oggolaadaan in dad kale kuu geystaan waxyeello? Taasi hadday dhacdo waxaad caawinaad ka heli kartaa maxkamadda, xafiiska dhowrista carruurta ee degmada, boliiska, ama xafiiskaaga kaalmada sharciga (legal aid). 2-1-1 waa hay'ad ka jirta gobolka oo dhan oo ku siinaysa macluumaad iyo nambarro taleefan oo caawinaad aad ka heli kartid.

Ka wac halkaan: 2-1-1 (gobolka oo dhan)

Ama ku hadal khadka (online) halkaan: [www.211unitedway.org/about-211/somali/](http://www.211unitedway.org/about-211/somali/)

Ama tekesti ku qor sibkowdkaaga (zip code) si aad caawinaad uga heshid meel kuu dhow halkaan: 898-211

**Haddii ay wax ku gaaraan ama aad ku jirtid khatar deg-deg ah, wac 911!**

## Caawinaadda carruurta ee degmada Hennepin

Xaaladda deg-degga ah, wac 911. Xaaladaha aan deg-degga ahayn, ama haddaad su'aalo qabtid, ama aad heli weyday caawinaaddii aad u baahnayd, wac Mashruuca Sharciga Dhallinyarada (Youth Law Project) (612)332-1441. Ama u dir iimeel [youthlawproject@mylegalaid.org](mailto:youthlawproject@mylegalaid.org).

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.